MIDNIMO ORGANIZATION
URURKA MIDNIMO

HL66169, Golis Street
Garowe, Puntland, Somalia
aajmagan@gmail.com
+1 763 501 5314

TAARIIKH May 11, 2025 REF UM1002PR

WAR SAXAAFADEED · PRESS RELEASE

Shirkii Madasha Wadatashiga Qaran ee qabsoomey May 5-7, 2025

- **Himiladii shirka laga lahaa** Ururka Midnimo wuxuu rajo weyn ka qabey in shirku noqdo shir qaran ee loo dhan yahay qaybna ka yihiin dhamaan Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Dhexe, ururada bulshada iyo Saamilayda siyaasadeed. Ururku wuxuu filayay in shirka lagu gaaro siyaasad mideysan ee xal u noqta khilaafaadka dalka ka aloosan, sida Dastuurka, khayraadka dabiiciga ah, awoodaha dowliga ah, Guddiga Doorashooyinka oo heshiis lagu yahay, habraaca doorashooyinka iyo amniga, taas oo keeni karta in dalku helo xasilooni siyaasadeed iyo midnimo qaran.
- **Jidka khaldan ee shirkii Madashu u weecday** waxaa wax laga xumaado ah in rajadii laga qabay shirka madasha qaranka lagu hungoobey. Taas oo shacabka ku noqotay han-jab iyo quus baaxadwayn. Mar hadii lagu guul dareystey Madasha qaran oo loo dhan yahay, waxay ahayd in shirku halkaas ku jogsado wakhtina la geliyo in xubnaha qaran ee shirka ka maqan wada hadal lagu raadiyo. Nasiibdaaro, waxaase dhacday in shirkii qaran ajandihiisii Meesha ka boxo oo isu badalo koox yar oo is-ogol in ay Xisbi-dan gaar ah laga leeyahay ay wada dhisanayeen.
- **Sharci la'aanta go'aanadii shirka ka soo baxay** qabashada, sii socodka shirka iyo go'aanadii ka soo baxay ma waafaqsana dastuurka dalka, maadaama ayan ahayn madal qaran ee loo dhan yahay taas oo ka dhigeysa inaan go'aankaasu ahayn sharci.

TUSAALE:

- Go'aanka ah in Jubaland maamul lagu dul dhiso, shacriyad uma laha saxiixayaasha go'aanka saxiixay. Jubaland waa dowlad xubin ka ah dowladda dhexe, dastuurka dalka ayaa siinaya in ay xaq u leeyihiin in ay qabsadaan doorashadooda. Shirkaan sharci darada ahi wuxuu sababay khalkhal siyaasadeed, iska horkeen bulsho, midnimo la'aan qaran, iyo xakamayn la'aanta ururada xag-jirka ah ee baneystay xasuuqa shacabka Somaliyeed.

Ururka MidNimo wuxuu soo jeedinayaa talooyinkaan:

> *Si dalka looga saaro khalkhalka siyaasadeed iyo fara-gelinta dastuur, waxaa lama huraan ah:*

1. In la abaabulo shirweyne qaran oo ay u dhan yihiin dowladda dhexe, dowlad goboleedyada, saamilayda siyaasadda, ururada bulshada iyo qurba-joogta Somaliyeed.
2. In lagu laabto Dastuurkii wadar-ogolka lagu ahaa ee 2012.
3. In xubnaha Aqalka Sare u istaagaan samata-bixinta midnimada qaranka iyo wada-jirka shacabka Somaliyeed. Maqnaanshaha dowrkiinii dasturiga ahaa ee isku-haynta wadajirka dalka ayaa ka mid ah sababaha keenay khakhalka siyaasadeed ee jira.
4. In dhamaan ururada bulshadu, sida culimada, haweenka, dhallinyarada, Indheer-garadka, iyo ganacsatu, qaataan dowrka kaga aaddan badbaadinta qaranka iyo midnimada dalka.

Abdirizak Jama
Chairman, Ururka Midnimo

Email ururkamidnimo23@gmail.com
Tel +1 763 501 5314